

Iska tallaalida COVID-19

**Vaccinate
WA** 

[CovidVaccineWA.org](https://www.CovidVaccineWA.org)

La dagaallanka cudurka safmareenka ah way adkayd, laakiin hadda waxaan haysannaa tallaal naga difaacaya COVID-19.



Tallaalka waxaa lagugu siinayaa lacag la'aan/bilaash.

Dawlada federaalka ayaa bixinaysa kharashka tallaalkaaga. Adeeg bixiyaasha caafimaadka ayaa laga yaabaa inay lacag kaaga qaadaan bixinta tallaalka, laakin caymiska caafimaadka ayaa bixin doona lacagtaas. Adeeg bixiyaasha ayaa kaa dhaafi doonaan khidmadda haddii aadan awoodin inaad bixiso.



Waydii Tirada kuurada aad u baahan tahay.

Waxaad u baahan doontaa laba kuuro oo tallaalada qaarkood ah, oo kala durugsan saddex ilaa afar toddobaad. Kuwo kale waa hal kuuro oo kaliya. Waxaad u baahan kartaa kuurada xoojinta labo illaa lix bilood kadib.



Tallaaladu waa kuwo badbaado iyo waxtar leh.

Tallaalada waxay waxtar wayn u leeyihiin inay ka hortagaan COVID-19. Dhammaan tallaallada ayaa midkood si buuxda u ansixisay ama u ogolaatay u adeegsiga xaaladda degdega ah U.S. Food and Drug Administration (FDA, Maamulka Dawada iyo Cuntada Mareykanka)—Micnaheeda oo ah in FDA aysan helin wax walaac badbaado oo halis ah.



Qof kasta oo jira 5 sano ama kasii wayn ayaa heli kara tallaalka.

Tallaalka Covid-19 waxaa heli kara qof kasta oo jira 5 iyo kasii wayn.-Dadka jira 5 illaa 17 sano waxay heli karaan tallaalka Pfizer-BioNTeck oo kaliya. Booqo [VaccineLocator.doh.wa.gov](https://www.vaccinelocator.doh.wa.gov) si aad u hesho una qabsato balan. Sidoo kale waxaad wici kartaa 1-800-525-0127, kadibna riix #. Si aad u hesho adeegyada turjumaanka, sheeg luuqadaada marka wicitaanka laga jawaabo.



Waxaa laga yaabaa inaad dareento waxyeelo gaar ah.

Sida tallaalada kale ee caadiga ah, waxaa laga yaabaa inaad garabka xanuun ka dareento, inaad dareento qandho, madax xanuun, ama daal ka dib markaad qaadato tallaalka. Kuwaani waa calaamado muujinaya in tallaalka uu shaqeynayo.



Badbaado ku joog.

Ka dib marka aad qaadato tallaalka, xiro maaskarahaaga, kala fogaada lix fiit (laba mitir), oo yaree kulammada.

Su'aalo maqabtaa? Booqo: www.CovidVaccineWA.org

Iska tallaalida COVID-19

Maxay yihiin tallaallada la heli karo?

Waxaa jira tallaalo dhowr ah oo la heli karo.

Dhammaan tallaallada ayaa midkood si buuxda u ansixisay ama u ogolaatay u adeegsiga xaaladda degdega ah U.S. Food and Drug Administration (FDA, Maamulka Dawada iyo Cuntada Mareykanka)—Micnaheeda oo ah in FDA aysan helin wax walaac badbaado oo halis ah.

Yay tahay inuu qaato tallaalka COVID-19?

Adiga ayay kugu xiran tahay inaad doorato qaadashada tallaalka. Haddii aad go'aansato inaad qaadato, waa inaad u sheegtaa adeeg bixiyaha ku siinaaya tallaalka haddii aad:

- Qabto taariikh ah fal-celin xasaasiyadeed oo daran
- Qabto qandho
- Qabto cillad xagga dhiigga ah ama aad qaadatid daawooyinka khafiifiya dhiigga
- Daciif ka tahay dhanka nidaamka difaaca jirka ama aad qaadanaysid daawo saameyn ku yeelata nidaamka difaaca jirkaaga
- Uur leedahay, aad qorsheyneyso inaad uur yeelato, ama aad naasnuujinayso
- Qaadatay tallaalka kale oo COVID-19 ah

Waa inaad qaadan tallaalka haddii aad xasaasiyad daran ku yeelatay qiyaas/doos hore oo tallaalka COVID-19 ah ama wax kasta oo tallaalka ka samaysan.

Tallaalka waxaa ku jira maaddooyinka firfircoon, messenger RNA (mRNA)) ama adenovirus, iyo sidoo kale dufan, cusbo, iyo sonkorta si loo ilaaliyo tallaalka oo gacana ay uga geystaan in tallaalka si fiican jidhka ugu dhex shaqeeyo.

Waa inaad jirtaa ugu yaraan 5 sano si aad u qaadato tallaalka Pfizer-BioNTech sidoo kale waa inaad jirtaa 18 sano si aad u qaadato tallaalka Moderna ama Johnson & Johnson.

Maxay yihiin waxyeelooyinka gaarka ah ee tallaalka?

Waa caadi in waxyeellooyin gaar ah laga yeesho tallaalka hal ama saddex maalmood ka dib marka tallaalka la qaato. Waxyeelooyinka caadiga ah waxaa ka mid ah daal, murqo xanuun, xanuun garabka lagaa durey ah, qandho, madax xanuun, xanuun dhanka kala goysyada jirka ah, qarqaryo, lallabbo, ama matag. Haddii astaamaha aysan kaa baabi'in, la xiriiir dhakhtarkaaga ama rugta caafimaadka.

Waa inaad sugtaa 15 illaa 30 daqiiqo kahor intaadan ka tegin goobta tallaalka si bixiyaha tallaalka uu kuu caawin karo haddii aad yeelato fal-celin xasaasiyadeed ama waxyeelo kale oo gaar ah. Intaad sii sugayso, waad iska diiwaan gelin kartaa v-safe si aad u soo gudbiso wixii waxyeelo gaar ah oo aad u isku aragto: v-safe.cdc.gov (Ingiriis keliya).

Adiga ama adeeg bixiyaha ku siinaya tallaalka waxaad sidoo kale wixii waxyeelo gaar ah ka soo sheegi kartaan Nidaamka Ka Warbixinta Xaaladaha Daran ee Tallaalka (VAERS): vaers.hhs.gov/reportevent.html (Ingiriis keliya).

Wac 911 haddii aad yeelato fal-celin xasaasiyadeed markii aad rugta caafimaadka ka tagtid. Calaamadaha fal-celinta xasaasiyadda waxaa ka mid ah: neefsashada oo kugu adkaata, wejigaaga iyo cunaha oo barara, wadnaha oo dhaqso u garaacma, finan jirka oo dhan ka soo baxa, dawakhaad, iyo daciifnimo.

Maxaa dhacaaya ka dib markaan is tallaalo?

Haddii aad hesho tallaalka leh labo kuuro, Ballan u qabso qiyaastaada/kuuradaada labaad ee tallaalka. Waxaad u baahan doontaa inaad ku soo laabato saddex ilaa afar toddobaad gudahood si aad u qaadato qiyaastaada labaad ee tallaalka.

Waxay qaadan doontaa illaa labo asbuuc kadib markaad si buuxda isku tallaasho si aad u hesho kahortag buuxa. Waxaa sidoo kale lagu talinayaa in lagu qaato kuuro xoojin ah laba ilaa lix bilood dhexdooda si aad u ilaaliso difaacaaga.